Somali = Soomaali

**Adeegga baafinta**

Laanqeyrta Cas waxay ka shaqaysaa inay dib u xidhiidhiso dadka ku kala lumay dagaallo ama khilaafyada. Waxannu raadinaa qaraabada, xubnaha qoyska iyo axsaabta.

Haddii aad qof qoyskaaga ah ku kala lunteen dagaal, colaad ama masiibo, waxa Laanqeyrta Cas raadin kartaa qofka la waayey.

Adeegga baafintu waxa uu caawiyaa dadka oo dhan, oo kuma xidhna jinsiga, da'da, siyaasadda, muwaadinnimada, qoomiyada ama diinta qofku ka tirsanyahay. Adeegani waa bilaash.

**Nala soo xidhiidh**

Ma u baahantahay in lagaa caawiyo raadinta qoyskaaga oo aad ku kala lunteen dagaal, colaad ama masiibo? La xidhiidh:

Adeega baafinta

Telefoon: +47 22 05 40 00

Iimayl tracing@redcross.no

Cinwaanka xafiiska: Hausmannsgate 7, 0186 Oslo

**Waajib sir-qarin**

Laanqeyrta Cas waxa saaran waajib sir-qarin. Waa sir-qarin buuxda oo khuseysa dhammaan xogta ay hesho Laanqeyrta Cas. Markaa wax xog ah ma siino Agaasinka Arrimaha Ajnabiga (UDI), booliska ama hay'addo gaar ah, haddii qofka baafiyaha ah ama wakiilkiisu oggolaanin.

Haddii dagaal, colaad ama masiibo aanay ahayn sababta la isu waayey waxa caawimo laga heli karaa Ciidanka Hanuuninta (Frelsesarmeen). Nasiibdarro wadamada qaarkood ayaan Laanqeyrta Cas ka raadin karin dadka. Arrimo siyaasadeed ama amaaan ayaa noqon kara sababta.

Haddii aad qoyskaaga weydey adoo u soo qaxaya Yurub, oo aanad ogeyn meesha ay joogaan, Laanqeyrta Cas kuma caawin karto. Laakiin waxannu samayn karnaa in aannu kaa diiwaangelinno kaydka sawirrada ee Trace the face. Sidaas waxa kugu arki kara dadka aad weydey. Haddii ay gartaan sawirkaaga waxa ay la soo xidhiidhi karaan Laanqeyrta Cas. Waxannu markaas ku weydiin doonna inaad rabtid xidhiidhka qofka ku raadinaya.

**La xidhiidh Adeegga Baafinta ee Laanqeyrta Cas si aad u ogaatid in baafin laga samayn karo waddanka la rabo in qofka laga raadiyo.**

**Markee ayey Laanqeyrta  Cas kaa caawin kartaa baafinta qofka aad is weyseen?**

Haddii aad qiyaas ahaan ogtahay meesha qofku joogo, laakiin aanad hayn meel aad kala xidhiidhid, caadi ahaan Laanqeyrta Cas way raadin kartaa.

Waxannu u baahannahay in aannu helno xog sugan si aannu u bilaabi karno raadinta. Ma ku filna in lambarka telefoonka ama in la ogaado waddanka uu joogo qofka la waayey. Waxannu u bahaannahay xog sugan oo ku saabsan meesha uu joogo qofku, si aanu u bilaabi karno raadinta.

**Waan oggahay meesha uu joogo qofka la waayey**

Laanqeyrta Cas raadin way ka samayn kartaa inta badan waddamada adduunka. Laakiin dad badan ayaa waayey xubno qoyska ah oo jooga waddamada ku xusan liiska hoose. Taas darteed waxannu dooranay in aanu faahfaahino xogta aannu u baahannahay si aanu raadin uga fulino waddamadaas.

**Afqaanistaan**

Afqaanistaan waxay u qaybsantahay gobolo, degmooyin iyo tuulooyin. Haddii la rabo in Laanqeyrta Cas qof ka raadiso Afqaanistaan waa in la sheego gobolka, degmada iyo tuulada.

Si aad u heshid xogtaas waxa aad Google ka baadhi kartaa: ”Afghanistan (magaca gobolka) land cover map”. Haddii aad tuulada ka heshid cinwaankan, soo daabac qariirada, calaamadi tuulada oo qariirada noo soo dir.

Waxa dhici karta in tuuladu lahayn nidaam. Dadka degan ayaa badan ama guryaha ayaa ku kala filiqsan dhul baxaad weyn. Si ay Laanqeyrta Cas ugu fududaato in hesho qofka la waayey, waxa tusaale loo soo qaadan karaa suuqa magaalada, dhismo caan ah, masaajid, buundo kor marta webi ama wax la mid  ah, kadibna waxa la sawiri karaa qariirad muujinaysa meesha uu ku yaalo guriga qofka waayey marka loo eego goobtaas.

Si ay u sii fududaato in la helo qoyska, waxannu codsanaynaa in la sheego magaca madaxa tuulada, qaraabada kale ee degan tuulada, deriska, axsaabta ama dadka kale ee yaqaana qoyska. Dadkaasi waxay ogaan karaan meesha qoysku joogo.

Laanqeyrta Cas waxay haysaa keliya xogta ku qoran foomka oo ay ku raadin kartaa qofka la waayey. Ma jiraan diiwaan dadweyne, diiwaan telefoon ama diiwaanno kale oo Laanqeyrta Cas isticmaali karto. Taas darteed waxa muuhim ah in xogta lagu qoray foomku ay tahay mid faahfaahsan, ilaa inta suurtagalka ah.

Inta badan way adagtahay in la ogaado in xogta la bixiyey ku filantahay in la bilaabo raadinta. Haddii wadahadal turjumaan lala yeelanayo qof raadiye ah, hore noola soo xidhiidh. Markaa wadahadalkaas waxannu kaga qaybgeli karnaa telefoonka. Sidaas ayaanu ku hubsan karnaa in aannu hayno warbixinta oo buuxda.

Haddii idinku buuxsateen foomka, fadlan nala soo xidhiidha intaydaan dirin. Waxaynu isla eegi karnaa xogta aad qorteen, oo waxaynu eegi karnaa in xogtaasi ku filantahay bilaabida raadinta.

**Soomaaliya**

Soomaaliya waxa muhiim ah qabiilada. Qabiilka ayaa lagu garan karaa qofka, sidaas ayaana lagu soo heli karaa qofka. Qabiilka guud oo keliya ma ku filna oo waa in la sheego xataa jufooyinka hoose. Halkan waxa ka muuqda qabiilada Soomaaliya.

Magaca dadka waa laga dhigo saddex magac: magaca qofka, magaca aabihiis iyo magaca awoowga aabihiis. Waa in la sheego meesha qofkaasi deganyahay. Ka bilow dhismo caan ah, suuq, buundo kor marta webi iyo wax la mid ah oo sawir qariirad muujinaysa jidka la marayo marka laga baxo goobtaas oo loo socdo guriga qofka la waayey.

Si ay u sii fududaato in la helo qoyska, waxannu codsanaynaa in la sheego magaca madaxa tuulada, qaraabada kale ee degan tuulada, deriska, axsaabta ama dadka kale ee yaqaana qoyska. Dadkaasi waxay ogaan karaan meesha qoysku joogo.

Idaacada BBC waxay Soomaaliya ku leedahay barmaamij lagu baafiyo dadka la waayey. Haddii la rabo in qof laga baafiyo barmaamijkaas idaacada, Laanqeyrta Cas ayaa laga codsan karaa.

**Itoobiya**

Itoobiya qofka magaciisu waxa u uka koobanyahay saddex magac: magaca qofka, magaca aabihiis iyo magaca awoowga aabihiis. Waa in markasta saddexdaas magac lagu soo sheego codsiga baafinta.

Magaalooyinka itoobiya waxay maanta u qaybsanyihiin: Kifle Ketema, Kebele iyo lambar guri. Sheeg xogtaas haddii aad ogtahay.

Hore waxa magaalooyinku u qaybsanaayeen Woreda (Kefetegna), Kebele iyo lambar guri. Haddii nidaamkaasi jiray xilligii raadiyuhu ka soo baxay Itoobiya, ha lagu qoro foomka baafinta.

Haddii raadiyuhu sheegi karin cinwaan noocaas ah, waa in uu sawiro qariirad sheegaysa meesha qofka la waayey deganyahay. Ka bilow dhismo caan ah, suuq, buundo kor marta webi iyo wax la mid ah oo sawir qariirad muujinaysa jidka la marayo marka laga baxo goobtaas oo loo socdo guriga qofka la waayey.
Si ay u sii fududaato in la helo qoyska, waxannu codsanaynaa in la sheego magaca madaxa tuulada, qaraabada kale ee degan tuulada, deriska, axsaabta ama dadka kale ee yaqaana qoyska. Dadkaasi waxay ogaan karaan meesha qoysku joogo.

**Ma oggi meesha uu joogo qofka la waayey**

2) In la shaaciyo sawirka qofka wax raadinaya. Diiwaan ay hayso guddida caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas oo joogta magaalada Jeneefa, waxa la gelin karaa sawirkaaga. Sawirkaas waxa arki kara qof kasta. Waa qaab la isku tusi karo qofka la raadinayo.  Haddii cid garato qofka sawirka leh, waxay la soo xidhiidhayaan Laanqeyrta Cas. Laanqeyrta Cas ayaa markaa qofka diiwaangashan weydiinaysa inuu rabo xidhiidhka qofka raadinaya. Markasta dadka ku jira diiwaanka ayaa go’aaminaya inay rabaan xidhiidhka, oo maaha Laanqeyrta Cas.

**Halis ma ku iman kartaa qofka la raadinayo?**

Qofka wax raadinaya ayaa aqoon u leh xaaladaha ka jira waddanka, markaana isaga ayaa la raba inuu go'aan ka gaadho in la bilaabo raadin iyo in kale. Laanqeyrta Cas ma qiyaasi karto halista iman karta. Laanqeyrta Cas waxa la hadli doontaa dad badan markay raadinayso qofka la waayey. Dhammaan dadka goobta jooga waxay kooban ku ogaan doonaan in la raadinayo qof/qoys. Haddii loo malaynayo in arrintaasi dhibbaato ku keenayso dadka la raadinayo, waa in laga fekero in kiiska raadinnta la bilaabo iyo in kale.

**Dirista farriimaha Laanqeyrta Cas**

[Farriimaha Laanqeyrta Cas waxa la adeegsadaa marka ay jiraan dagaallo, colaad ama masiibo caqabad ku ah dirista boosta caadiga ah. Adeegga farriimo diristu waa bilaash. Laanqeyrta Cas waxay sida kale farriimaha u kala gudbisaa maxbuusta dagaal iyo shacabka xerooyinka lagu xidhay, iyo ehelkooda.

[Farriimaha Laanqeyrta Cas waxay ka koobnaan karaan keliya arrimo ku saabsan qoyska. Kuma saabsanaan karaan arrimo khuseeya diin, siyaasad ama ciidan. Laanqeyrta Cas way akhrin doontaa farriimaha intaan la dirin, haddii loo baahdana way ka tirtiri doontaa xogta la oggolayn in farriinta la raaciyo. Taas darteed waa in farriimaha Laanqeyrta Cas lagu qoro af-noorweyji ama ingiriisi. Sawir waa la raacin karaa, laakiin lacag ama walxo kale lama raacin karo farriimaha Laanqeyrta Cas.

Farriimaha waxa lagu qorayaa foomam loogu talogalay, waxaana loo dhiibayaa Laanqeyrta Cas. Waxa la marinayaa shabakadda Laanqeyrta Cas, oo ka kooban 190 laan-waddanneed oo ah Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas.

**Baafin la xidhiidha Dagaalkii labaad ee adduunka**

Laanqeyrta Cas waxay tijaabin kartaa inay hesho xog ku saabsan maxbuus dagaal, maxbuus ku jirta xero ururineed, aaskar jarmal ah oo joogtay Noorwey xilligii dagaalkii labaad ee adduunka, aaskar jiid hore iyo kuwa la midka ah.

**Goorma ayaan jawaab ka helayaa Laanqeyrta Cas**

Marka kiiskaaga ay dhammayso Laanqeyrta Case e Noorwey, waxa laguu soo diri doonnaa iimayl ama waraaq ogeysiin ah. Kadibna waxa kiiska loo gudbin doonaa waddanka laga fulinayo raadinta.
[Waxay qaadan kartaa lix bilood ilaa sannad inta Laanqeyrta Case e Noorway helayso jawaab ku saabsan kiiska. Marka aannu helno jawaab, waannu kula soo xidhiidhi doonaa, oo waxannu ku sheegi donna natiijada. Markasta waxa aad naga heli doontaa jawaab, haddii lagu guulaystay baafinta iyo haddii kaleba.